

Xarumaha daryeelka aasaasiga ah ee mudnaanta leh

RASMI AH

- Ma u baahan tahay inaad si degdeg ah u aragto dhakhtar?
- Xarumaha Daryeelka Aasaasiga ah ee mudnaanta leh (Priority Primary Care Centres - PPCCs) waxay bixiyaan daaweyn lacag la'aan ah oo loogu talagalay qof kasta oo qaba dhaawacyo ama jirro degdeg ah.
- Dhakhaatiirta PPCC ayaa kaa caawin doona inaad hesho daawaynta aad u baahan tahay si ka dhakhso badan marka loo eego qaybta xaaladaha degdega ah ee isbitaalka.
- Waxay daweyn karaan xaaladaha sida caabuqyada fudud, gubashooyinka fudud, murkacashada ama lafaha looga shaki qabo inay jaban yihiin.
- Haddii aad qabto dhaawac daran ama jirro, wac nambarka Saddexda Ebar (000).
- Haddii aadan u baahnayn daryeel degdeg ah, ballan ka qabso dhakhtarkaaga caadiga ah.
- Adeegyada PPCC waxaa ka mid ah shaybaarada, raajooyinka iyo farmashiyaha.
- Adeegyada PPCC waa u lacag la'aan qof kasta, oo haysta ama aan lahayn kaarka Medicare.
- PPCCs waxay furan yihiin saacado dheeri ah, todobada maalmood ee usbuuca.
- Uma baahnid ballan.
- Waxaa jira PPCC-yo ka furan Victoria oo dhan.
- Booqo kanaalka Caafimaadka Wanaagsan (Better Health Channel) si aad u hesho goobaha iyo macluumaad dheeraad ah: www.betterhealth.vic.gov.au/health/servicesandsupport/priority-primary-care-centres
- Turjubaano ayaa laga heli karaa PPCC-yada. Ka wac Adeegga Fasiraada iyo Turjumaada (Translating and Interpreting Service - TIS National) 131 450.